WARSIDAHA AGA

AGA NEWSLETTER

WAA WARSIDE-XILLIYEED KU HADLA CODKA
AKADEEMIYE-GOBOLEEDKA AFSOOMAALIGA (AGA)
A PERIODICAL NEWSLETTER PUBLISHED BY THE
INTERGOVERNMENTAL ACADEMY OF SOMALI LANGUAGE

TIRSIGA 11AAD, SANNADKA 3AAD, LUULYO– SEBTEMBAR 2020

TUSMADA TIRSIGAN

EREYGA TIFAFTIRKA
Qoraalka & Akhriska: Awoodda Gudbinta Aqoonta & Ogaalka……..Bogga 2aad

QORMOOYIN HORTABIN MUDAN
Dhextaallaynta Maansada……..Bogga 4aad
Saamaynta Karoona ku Yeeshay Xarumihii afka iyo Dhaqanka…….Bogga 5aad

WARARKA WAXQABADKA AGA
Madasha AGA & Aaladda ZOOM-ka …..B. 6aad
Siihayaha Raiisal-Wasaaraha Soomaaliya oo Bogaadiyay Dadaalka AGA , ……..Bogga 7aad
Wasiir Cawad oo Yididdiilo ka Dhiibtay Doodcilmiyeeddii Madsha AGA…….. Bogga 7aad
Wasiirka Dhaqanka iyo Dalxiiska DDS oo ka Hadlay Xaaladda Adeegsiga Af Soomaaliga ee DDS……..Bogga 8aad
Wakiilka Akadeemiye-Goboleedka AGA ee Galmudug Abwaan Cali Deeq oo la Kulmay Maamulka Galmudug……..Bogga 8aad
Macallin Saciid Saalax: “Afka Soomaaligu wuxuu Safka hore kaga Jiraa Afafka ugu Muhiimsan Qaaradda Afrika”……..Bogga 9aad
Dhismaha Xarunta AGA oo soo Gaaray meel Wanaagsan……...Bogga 9aad

WARAR KALE OO XUSID MUDAN
Gorfaynta Buugga Godob iyo Gallad B. 10aad
Xarunta Laashin oo u dabbaaldegtay 6-sannoguudeedii……..Bogga 10aad
Aqoonwadaag ZOOM: Xusuusta Suugaanta & Sooyaalka Dawladnimada Soomaaliya 1960 – 1991……..Bogga 11aad

KORORSO AQOONTAADA
Eray-Abuurid (Naxwe)……...Bogga 13aad

SUUGAANTA & HAL’ABUURKA
Gaashaanqaad Habaabay……Bogga14-15aad

GOOSANKA TIFAFTIRKA

Tifaftiraha Sare
Mustafa C.Fayruus

Agaasimaha
Axmed M.Dhicisow

Agaasimaha Farsamada
Axmed Faarax Saalax

Kaaliyaha Farsamada
Amiin Yuusuf Khasaaro

Xoghayaha Titaftirka
Saynab Xaaji Axmed

Bahda tifaftirka
Cabdullaahi Shiiqaalow
Cabdiraxmaan Abtidoon
Cabdullaahi sh. (Gacanka)
Dayax Axmed Ilay

Kala xiriir : info@aga.so
Facebook: @aga.afsoomaali
Twitter:@somaliacademy
Website :www.aga.so

HADAFKAYAGU WAA HIILKA AFKA HOOYO IYO HAL-ABUURKIISA

Ku soo Dhowaada Warsidaha AGA!

Warsidaha AGA waa warside-xilliyeed ay soo saarto Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu (AGA), oo idiin soo gudbiya aqoon isugu jirta xog-wadaag, aqoon-wadaag iyo talo-wadaag.

Warsidahan ujeeddooyinka loo aasaasay waxaa ka mid ah in uu ehelada afka, hal`abuurka, dhaqanka, qoraalka iyo aqoon-faafinta ee daafaha dunida kala jooga la socodsiiyo hawlaha muhiimka ah ee ku saabsan arrimaha kor ku xusan. Warsiduhu wuxuu ururiyaa, kaydiyaana dhacdooyinka muhiimka ah iyo waxqabadka arrimaha kore.

Wixii ah fikrado iyo talobixin ku saabsan sii hagaajinta, hannaaninta iyo horumarinta warsidahan aad ayaan u soo dhoweynaynaa.

Sidoo kale, gacmo furan ayaan ku soo dhowaynaynaa qoraallada ay soo gudbiyaan qalinleyda iyo ehelada Af-Soomaaligu.

***Warsidahani wuxuu ku soo baxaa nuqul daabacan iyo mid elektoroonig ah* (eeg *www.aga.so*).**
Cinwaanka lagala soo xiriirayaa waa Email: info@aga.so

XEELDHEERAYAASHII SOO JEEDIYAY MADASHA AGA

ERAYGA TIFAFTIRKA

Qoraalka & Akhriska:
Awoodda Gudbinta Aqoonta & Ogaalka

Muddo dheer ayuu aadanuhu ku dadaalayey horumarinta awoodda gudbinta aqoonta iyo ogaalka. Qoraalka ayaa soo maray heerar kala duwan, dhagxaan iyo looxyo la xardho, xarfo kala duwan oo la hindiso oo mar walbaana la horumarinayey, ilaa farta dadka aragga la' ee uu allifay Louis Braille qaadatayna magaciisa ay ku soo biirto aqoonta dunida qaybna ka noqoto in waxbarashada loo sinnaado. Markii la galay xilligan casriga ahna makiinado wax lagu qoro iyo kuwo wax lagu daabaco ayaa soo kordhay oo hawlihii fududeeya quxiyeyna.

Xilligan ay dunidu ku tartanto aqoonta ayaa qoraal-akhrisku u yahay fure, bulsho aan lahayn karti qoraal-akhris waxay halis u tahay dib u dhac joogta ah mana gaarto xorriyad maskaxeed iyo mid maanba. Qoraalkii farta Soomaaliga ka dib, Soomaaliya waa tii qaadday ololayaal lagula dagaalamayey jahliga; kuwaasoo laga gaaray guula waaweyn duniduna uga marag furtay. Iyadoo markii hore tirada dadkeenna ee wax qorta ama akhriyi kartaa lagu qiyaasay in ka yar 10%, ayaa ololayaashii is daba joogga ahaa ka dib waxaa tiradii la gaarsiiyey in ka badan 46%. Waxay ahayd guul weyn oo u soo hoyatay ummadda Soomaaliyeed miyi iyo magaalaba. Hase yeeshee, waxaan shaki ku jirin in dhibaatooyinkii badnaa ee aanu soo marnay ay keeneen hoos u dhac baaxad weyn oo heerkii aanu gaarnay bartamihii toddobaatamaadkii iska daa in aan horay uga sii soconnee uu dhimmaal weyn uu ku yimid

Soomaaliyana lagu tiriyo dalalka ugu hooseeya dunida dhanka qoraal-akhriska.

Dadaallo badan ayay shakhsiyaad iyo hay'ado madaxbannaan wadeen sannadihii aanu soo dhaafnay.

Waxaan shaki ku jirin kaalintii ballaarnayd ee Akademiye-Goboleedka AfSoomaaliga "AGA" iyo Naadiga Qalinleyda iyo Hal-abuurka Soomaaliyeed "Somali Speaking PEN" ay ku lahaayeen baraarujinta iyo kor u qaadidda qoraal-akhriska, maantana ay weli ka yihiin horkacayaal loo aqoonsan yahay kaalintooda hormuudnimo.

Labadaas hay'adood waxay soo saareen qoraallo ku saleysan aqoon baarisyo ay sameeyeen, waxay si joogta ah u qabtaan aqoon isweydaarisyo, waxay dhiirrigeliyaan tabaabarrana ay siiyaan dadka leh hibada iyo kuwa jecel in ay wax qoraan, waxay weyneeyaan munaasabadaha qoraalka iyo hal-abuurka.

Ruux walba oo innaga mid ah inta uu is xilqaamo ayay ku xiran tahay horumarka aan ka gaari karno higsigeenna, gaar ahaan dhanka qoraal-akhriska. Waa mid aan keli keli iyo wadarba u sameyn karno. Annagoo ka duuleyno halkudheggii ahaa "Haddaad taqaan bar, haddaad aqoonna baro" ayaan qaadi karnaa olole aan si rasmi ah loo shaacin balse mira dhal ah, waxaana ka dhalan kara olole aan abaabulneyn balse la mid ah kuwii horraantii iyo bartamihii toddobaatameeyadii . Ruux aan horay u helin fursad uu ku barto qoraal-akhriska haddii aan siiinno waqtigeena in yar oo ka mid ah, waxaa ka soo bixi kara natiijo lama filaan ah oo weyn. Bal qiyaas tirada baaxaddaa leh oo wax barata iyo sida ay u fududeyn karto horumarka ummaddeenna.

Qoraa Sare

Cabdiraxmaan Maxamed Abtidoon

QORMOOYIN HORTABIN MUDAN

Dhextaallaynta Maansada

Dhextaallaynta maansadu waa habab falkineedyo jeedo qeexideeda, macnafuurkeedsi gaara loogu dhiso dhammaan jaadad-tixeedyada kala duwan ee maansada, oo heemaaliya habdhaca sargooyadooda. Iyadoo loogu xilanayo in lagu dhumuc cusleeyo hadba xogta lagu gudbinayo falkada meeriseyntooda.

Dhextaallaynta maansada, siyaallo kala duwan ayey ugu soohmaan haltirinnadeeda kala geddisan. Jaada-dhextaaleed waliba oo ay maansadu ku soohanto. Waxaa jira xaalado loo cuskado Tixda ku soohidiisa. Iyadoo loo eegayo xulashadiisa hadba xogta la doonayo in uu ku gudbiyo Tixda nooca ay tahay ku habboonaantiisa awgeeda. Haddaba, halkaa waxaa innoogu caddaadey kala duwanaanta dhextaallada maansadu ay ku falkinsanto meeriseynteeda iyo jaad-dhextaaleed waliba in ay jirto sababo loogu xisho ku soohidiisa tixda oo madhaafaan u ah.

Inta aynaan u gelin faaqidaada Dhextaallaynta maansada, guud ahaan iyo gaar ahaan habaabka ay ugu soohmaan haltirinnadeeda kala duwan. Marka hore aan iftiimino qeybaha dhextaallada maansada ay u kala baxaan tusmeyntooda. Guud ahaan marka aan u kuurgalno qaabdhismeedka haltirinnada maansada qoran. Oo aan isku soo xeerino dhextaallada ay ku kala soohan yihiin. Waxaan ku soo ururin karnaa: Seddax jaad dhextaaleed oo kala ah:

Dhextaal qodobeynta maansada.

Dhextaal cusleynta maansada.

Dhextaal baanida maanseeyaha.

Dhextaal-Qodobaynta Maansada

Faaqidaada dhextaal-qodobeynta maansada, inta aynnaan u gelin. Waxaa xusid mudan Dhextaallaynta haltirinnada maansada ku soohida falkada meeriseyntooda. Inkastoo ay ka wada simman yihiin dhammaan jaadad-tixeedyada maansada oo aannu jirin mid ka maarma. Haddana waa ay ku kala badan yihiin dhanka dhextaal adeegsigooda. Gabeyga ayaa ah kan ugu adeegsi badan dhextaalka dhammaan haltirinnada kale ee maansada, oo ma jiro jaad-tixeed soo dhaweynaya gabayga marka loo eego heerka uu ka joogo Dhextaallayntiisa-tixeed. Sababta, uu ugu adeegsi batey waxba iyada taa hadda u geli meyno oo waxay innaga duweysaa mowduuca qormadeenna diiraddu saaran tahay iftiiminteeda.

Haddaan u soo noqdo, faaqidaada dhextaal qodobeynta maansada. Waxaa loogu xishaa ku soohideeda tixda, marka la doonayo in lagu gudbiyo, dhowr arrimood oo kala geddisan oo haddana isku daaban kala soocidooda ayaa loogu saleeyaa sababteeda. Si aanay tixdu u noqon mid isku dhexyaacsan oo uu mugdi galo macnagudbinteeda.

Dhextaal-qodobeynta maansada. Waxaa had iyo jeeraale lagu falkiyaa awal-bilowga Tixda oo dulmar ahaan loogu kala qeexo hadba arrimaha gundhigga u ah xogtebinteeda. Kala qodobeyntaasoo u sahleysa maanseeyaha inuu marba qodob u galo faahfaahintiisa. Bal aan tusaale u soo qaadano dhextaal-qodobeynta mid ka mid ah, tixooyinkii horey loogu soohey awal-bilowga meerisyeeda oo aad ku garataan.

Indhaweydba waataanan qubin
qaaraddii gabaye,
Waan ka qatanaa meeshan iyo
qubadkii deyreede.
Marka idinka qaarkiin gam‘aa
leygu soo qubaye.
Qamaan iyo sidii Weerar baan
ugu qiseeyaaye.
Qaraabooy i maqal caawa waan
soo qaddimayaaye.
Qodob waxaan ka iri dunidan iyo
qabaan ka faalleeyey.
Qodobna waa degmada reer Xasan
qowlaan maqashiiyey.
Qisa kalena waa anniga iyo
qun iska sheegeyga.

Aar Maxamed Dhowre

Dhextaal Cuslaynta Maansada

Jaad-dhextaaleedkan ku soohidiisa Tixda. Waxaa loogu xishaa in lagu dhumuc cusleeyo hadba xogta la doonayo in lagu gudbinayo falkadeeda. Si ay saamayn u yeelato dhacda werinteeda oo loogu baraarugo miisaanka ay leedahay muujinta ogaalkeeda.

Jaad-dhextaaleedkan qaab ahaan waa soo celcelin, tuduc ama tuducyo isku mida oo aan marna is beddelin xarafraacooda erayeed oo hadba ku soo noqnoqda Tixda taxankeeda. Jaad-dhextaaleedkan tixooyinka loo xusho in lagu sooho qaabdhismeedkooda. Waxay u sameysaan qaab hooris hooris ah taxanka meerisyadooda oo ah:

Tuducyo isku sargo'an sida: Seddax seddax ama afar afar....iwm. Tusaale ahaan, tixooyinka hooris hooriska u sameysma qaabdhismeedkoodu. Waa sida meerisyada soo socda oo kale.

Safnigii abaartiyo la reeb
sifihii jiilaale.
Caanaha saboolkiinu nacay
yaan sac maashadaye
Suus gabanna innaynaan mitibin
geela igu siiya.
Samri waayayoo waxaan deymoon
sidigtii Maahire
Saakana hal gaadhi muddada
soolka igu daaya
Seeddiyo abtaan wada nahay
geela igu siiya.

Aw Yuusuf Barre

Geesta kale jaad-dhextaaleedkan dhumuc cusleynta Tixda oo ah soo celcelinta meeriska ama meerisyada oo hadba ku soo noqnoqda taxankeeda. Waxay xambaarsan yihiin dulucda Tixda biyadhaca u ah xogtebinteeda. Bal aan soo qaato laba tusaale oo aad ku kala garataan soo qaato tixooyinkii horey loogu soohey qaar ka mid ah meerisyadooda.

Tusaalaha 1aad: Soo Celcelinta Meeris Qura Dhextaallayntiisa

Aan soo qaato gabey dheer oo uu mariyey AHN Cali Xuseen Xirsi. Oo uu dhextaal uga dhigey soo celcelinta meeriska soo socda:

Gabaygaan rakibey iyo dhulkaan
xaley garaacaayey.
Gurxanka iyo reenkaad libaax
go'aya moodeysey.
Gam'i waayay Soomaaliyeey
gocoshadaadiiye.
Sidii odey gablamayoon wuxuu
dhaley gargaaraynin.
Oo fiid gadhkiyo labada low
meel isugu geeyey.
Gam'i waayey Soomaaliyeey
gocoshadaadiiye.
Sidii gaari kii qabay dhintoo
galab la sii qaadey.
Oo gorodda loo geliyey midaan
gabadhu dooneynin.
Oo geeridiisii ilmada
gabax ka siineysa.
Gam'i waayey Soomaaliyeey
gocoshadaadiiye.

Tusaalaha 2aad: Soo Celcelinta Meerisyada Dhowrka ah

Aan soo qaadann gabaygii abaaldhaca ahaa ee uu mariyey AHN Salaan Carrabey. Waxaa dhextaal u ah oo hadba ku soo noqnoqonaya taxankiisa afartan meeris ee ah:

Dumarkuba xublada foosha waa
xanaf wareeraane.
Bal inay xusuus daran yihiin
xaylka kale mooge!
Waxba yaanu xeerkey i marin
xoogna ii furine.
Xaasha e nin libin kaa xistiyey
xumihii waa yaabe!

Dhextaal Baanida Maanseeyaha

Jaad-dhextaaleedkan baanida. Wuxuu maanseeyuhu ku muujiyaa heerka sare ee uu ka joogo halabuurka Tixda iyo sida uu ugu caanbaxay murti heli ogaan. Waana kala-wareegid arrin laga soo warramey ka gudbideeda iyo u gelidda tu kale oo hor leh wax ka dhihideeda. Geesta kale, jaad-dhextaaleedkan marka laga tago baanida maansayahanka, oo laga eego dhanka kala-wareegidda labada arrimood kala soocidooda xogeed. Wuxuu si dadban ula qaab yahay jaad-dhextaaleedka qodobeynta ee aan kor ku soo marney. Waxaa kaloo xusid mudan Jaad-dhextaaleedkan baanida ama kala wareegida waxaa fure u ah garashadiisa erayga Afartaasi... sidaa iyo.... sidaa. Bal aan tusaale u soo qaadano mid ka mid ah tixooyinkii horey loogu soohey qayb ka mid ah meerisyadeeda.

Afartaasi ballaysinka horaan
bilic u yeellaaye.
Waxaan baydda uga giijiyaa
baxar colaadeede.
Jeeraan baroorkiyo sengaha
badi u soo fuulo
Oo ay bullaaliyo hadhaan
baqal nin heenseystay.
Ma badheedhin maansada haddaad
bogan lahaydeene.
Balfis gabaygu iiguma baxee
eray kalaan baaney.

Yuusuf Shaacir

Gebagebadii qormadan kooban ee aan ku qaadaadhigey dhextaallada maansada. Waxan ku soo gunaanadayaa keliya waa iftiimin bilow ah ee ma ahan mid biyo kama dhibcaan ah. Maadaama horey wax muuqda oo la sheego aan looga qorin jaadad-dhextaaleedyada maansada, oo ay taasi u baahan tahay in cilmibaaris intan ka qotadheer lagu sameeyo. Si looga gungaaro dhextaallada ay maansadu yeelan karto kala saleyntooda.

W. Q. Macallin
C/laahi Sh Cabdi (Gacanka)

Murti iyo Maahmaah
“Iftiimin Kooban”

Waxaan maqalnaa erayada isku lammaan, sida: murti iyo maahmaah, tix iyo tiraab, sheeko iyo shaahid, war iyo wacaal ikk. Quruxda iyo afshaxannimada ka sokow, waa xirfad iyo hab ay Soomaalidu u abla`ableeyaan ama isu raaciyaan aqoonta iyo kasmada, isla markaana sahla helidda iyo soo xusuusashada.

Halkan ayay ku arooraan labadan eray ee “murti iyo maahmaah”.

Waase maxay murti iyo maahmaah? Maxay kala yihiin? Maxayse isu yihiin?!

Murtida iyo maahmaahdu waxa ay bilaan hadalka, waxayna xoojiyaan fahmidda dulucdiisa. Waxay hadalka taraan qurux, tayo iyo dhumuc intaba.

Murtidu waa “hadal kooban oo farshaxannimo leh, oo xambaarsan kasmo iyo aqoon run ah oo laga helay waaya-argnimada”.

Maahmaahdu waa “hadal kooban oo farshaxannimo leh, oo dhacdo ama munaasabad ku soo baxay deedna faafay oo dadku jeclaysteen milgaha uu xambaarsan yahay darteed”. Maahmaahda waxaa la soo qaataa marka la arko dhacdo u eg dhacdadii ay ku soo baxday.

Maahmaahda waxaa ka mid ah:

1. Adduun i khatal.

2. Maalintaan tabar hayay talo ma heyn, maanta oon talo hayana tabar ma hayo.

3. Dani waa seeto.

4. War taladii ba`day!, sow laba tallaabo dhexdood talo kama dhalato.

5. Canaan ka yaab reer/beel ma doojo.

Shantan maahmaahoodba way inna soo gaareen munaasabaddii ay ku baxeen. Labada hore waxaa loo tiiriyaa Aadan Galaydh, tan saddexaadna Ducaale Suldaan, halka labada u dambeeya ee afraad iyo shanaad ay inna soo gaartay sheekadii ama munaasabaddii ay ku dhasheen laakiin aynaan hayn qofkii curiyay, oo xusuus wadareedkii bulshada ka baxay.

Halkaa waxaa ka muuqata in farqiga ugu weyn ee u dhexeeya murtida iyo maahmaahdu uu yahay munaasabaddii ay ku soo baxeen, oo maahmaahdu dhacdo wadato.

Muddo ka dib, waxaa dhacda in maahmaahda keli ahi ku harto maskaxda dadka, lana illoobo dhacdadii maahmaahdu ku soo baxday. Halkaana maahmaahdii kula masawdo murtida.

Maahmaahda waxaa lagu tiriyaa inay tiraab tahay. Haddana badanaaba astaamihii tixda wax bay ka wadataa. Badanaa maahmaahdu qaafiyad ayay leedahay, qiyaastiina maahmaah kastaa markii ay soo baxaysay qaafiyad ayay wadatay, oo adeegsigi badnaa ayay maahmaahaha qaarkood qaafiyaddii ku lumiyeen.

Murtidu, iyadu, tix iyo tiraab labadaba way noqotaa. Waxaa jira murti iyadoo tiraab ah la curiyay, halka mid kalena ay ahayd meeris ama dhowr meeris oo tix ka mid ahaa.

Waad wada xusuusan kartaan murtida tiraabta ah, ee bal aan dhowr ka tilmaamo murtida tixda ah.

Nin labaatan buuxsaday adduun
way legdamayaane
Salaan Carrabey

Maandhow ixsaan lagama tago
eed haddaad faliye
Sayid Maxamed C Xasan

Murti iyo maahmaah kasta qof ayaa curiyay. Hase yeeshee mar kasta oo murtida ama maahmaahda la sheegayo lama raaciyo ciddii curisay. Sidaas darteed, muddo dabadeed qofkaasi wuu ka baxaa xusuusta bulshada, oo waa la illoobaa.

Maahmaahda qaarkeed waxaa la garan karaa xilliga ama degaanka ay ka soo baxday. Tusaale ahaan, “Luuqluuq marrow laasim laamiyaas ku dhacaa” waxaa laga garan karaa in la curiyay muddo aan sii dheerayn, laguna curiyay degaanka Banaadir ama inta ku xeeran.

W.Q. Bare Sare
Mustafa Fayruus

WARARKA WAXQABADKA AGA

Madasha AGA & Aaladda ZOOM-ka

Iyadoo lala jaanqaadayo dadaallada lagu xakamaynayo faafitaanka safmarka Covid-19 darteed, laga soo bilaabo bishii Juun 2020 "***Madasha AGA ee Horumarinta Afka Hooyo iyo Hal-abuurkiisa"*** waxaa lagu qabtaa aaladda ZOOM, waxaana si toos ah loogu baahiyaa baraha bulshada, sida Facebook LIVE. Waxaa si joogto ah ula socda madashan kumanaan qof oo kala jooga dalalka Geeska Afrika iyo qurbajoogta ku faafsan daafaha dunida.

Madashii bisha 7aad ayaa la qabtay 17/7/2020. Cinwaankii looga hadlay wuxuu ahaa: **"Dhigaalka af Soomaaliga: Dhibaatooyinka jira iyo dhabbaha xal-raadinta".** Martida Madasha ayaa kala ahaa: Prof Cabdalla Cumar Mansuur, Macallin Saciid Saalax, Prof Cabdisalaan Ciise Salwe, Macallimad Saynab Aaden iyo Bare Sare Mustafa Fayruus.

Xeeldheerayaashaas ayaa ka hadlay mideynta qoraalka (Standarization), baraha bulshada iyo qoraalka af Soomaaliga, erayada lammaanayaasha ah sida ay isku raacaan iyo sida ugu habboon ee loo qoro, ka faa'iideysiga barnaamijyada kala duwan ee kombiyuutarka, gaar ahaan sixidda qoraalka iyo higgaadda.

Madashii bisha 8aad waxaa la qabtay 8/8/2020. Cinwaankii looga hadlay wuxuu ahaa: "**Xaaladda Adeegsiga Af Soomaaliga ee Maamulka iyo Ganacsiga".** Martida Madasha ayaa kala ahaa: Siihayaha Ra'iisul Wasaaraha, JFS Mahdi Maxamed Guuleed, Wasiirka Arrimaha Dibedda ee JFS Danjire Axmed Ciise Cawad iyo Macallin Siciid Saalax Axmed oo ah Wakiilka Akadeemiyada ee Woqooyiga Ameerika.

"Dawlad ahaan waxaa naga go'an in aan Akadeemiyada AGA kala shaqayno noolaynta, daryeelka iyo horumarinta afka hooyo" ayuu yiri kusimaha ra'iisulwaasaraha. Wasiir Cawad, ayaa soo jeediyey talo iyo dardaaran la xiriira adeegsiga afka ee hay'adaha Soomaaliya, caqabadaha jira iyo sida looga bixi karo.

Macallin Siciid ayaa si waafi ah uga hadlay afka iyo waxa uu qofka u taro. Wuxuu si qotadheer oo cilmiyeysan uga hadlay muhiimaddu afku u leeyahay qaybaha bulshada.

Madashii bisha 9aad waxaa la qabtay 5/9/2020. Cinwaankii looga hadlay wuxuu ahaa: "Xaaladda adeegsi AfSoomaaliga DDS." Martida Madasha ayaa kala ahaa: Dr. Cabdinaasir oo ah Guddoomiye Ku-xigeenka AGA, Macallin Maxamuud Maxamed oo ah wakiilka AGA DDS iyo wasiirka Dhaqanka iyo Dalxiiska DDS, Ilyaas Abiib Maxamuud.

Madasha waxaa furay guddoomiyaha AGA Dr Maxamed D. Afrax oo kulanka faahfaahiyey, isla markaana ku soo dhaweeyey martida.

Wasiir Ilyaas ayaa sharraxaad kooban ka bixiyay sida xukuumadda DDS ay uga go'an tahay horumarinta AfSoomaaliga. Sidoo kale, waxaa hadlay Macallin Maxamuud. Wuxuu ka sheekeeyay heerarka adeegsiga AfSoomaaliga ee DDS, goobaha waxbarashada, xafiisyada dowladda iyo sida uu afka Soomaaliga u yahay luuqadda koowaad ee dawlad deegaanka Soomaalida. Dr. Cabdinaasir ayaa ku dheeraaday taariikhda AfSoomaaliga iyo sida ay muhiim u tahay in la daryeelo.

"***Madasha AGA ee Horumarinta Afka Hooyo iyo Hal-abuurkiisa"*** waxaa la daahfuray bishii Diisambar 2017, waxay kulmisaa ehelada AfSoomaaliga iyo suugaantiisa, bahda dhaqanka iyo aqoon-faafinta, bahda waxbarashada iyo cilmibaarista, iyo cid kasta oo ku hawlan ama jecel afka, hal-abuurka, dhaqanka, qoraalka iyo aqoonta.

Madashani waxay ka mid tahay waxqabadka joogtada ah ee bil kasta ay hirgaliso Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga (AGA) iyadoo ka duulaysa qorshe-hawleedkeeda iyo himilooyinka loo dhisay.

Siihayaha Raiisal-Wasaaraha Soomaaliya oo Bogaadiyay Dadaalka AGA

Sii-hayaha Ra'iisul Wasaaraha JFS Mudane Mahdi Maxamed Guuleed ayaa bogaadiyay dadaallada iyo hawlaha kala duwan ee Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu ugu hiilliso afkeenna hooyo.

Mudane Mahdi oo ka hadlayay furitaanka madashii AGA ee aaladda ZOOM-ka lagu qabtay 8/8/2020 ayaa sheegay Alkadeemiye-Goboleedku ka mid tahay xarumaha cilmiyeed ee kaalin muuqata ka qaadan kara dibudhiska qaranka Soomaaliyeed.

Mudane Mahdi Guuleed oo si rasmi ah u furay madasha "Xaaladda Adeegsiga AfSoomaaliga ee Maamulka iyo Ganacsiga."

"In sidaa loogu soo hiloobo, looguna soo hirto madal lagaga hadlayo af Soomaaliga iyo qiimihiisa, oo tirada dadkii loogu talaggalay buuxdhaafto, waxa ay tusaysaa, sida weli aynnu u noolnahay, oo aynnu u jirno una qiimaynaynno jiritaankeenna ummadeed. Aad ugu faraxsanahay, idinkuna hambalyeynayaa, idinkuna bogaadinayaa shirkan caawa, qabanqaabadiisa iyo soo agaasimiddiisa.

Adeegsiga AfSoomaaliga ee Maamulka iyo Ganacsiga waa laba mowduuc oo muhiim ah. Dawladdu waxay siyaasaddeeda xikmadda ku dhisan kula wadaagaysaa afka hooyo." ayuu yiri md Mahdi Guuleed.

Mudane Mahdi Guuleed, ayaa sidoo kale soo qaatay, tusaalooyin la xiriira eray-bixintii afka hooyo.

Wasiir Cawad oo Talooyin ka Dhiibtay Aqoonwadaaggii Madasha AGA

Wasiirka Arrimaha Dibadda JFS, Amb Axmed Ciise Cawad oo ka mid ahaa martidii madashii bishii 8aad ayaa u mahadceliyay Akadeemiye-Goboleedka.

"Waxaan u mahadcelinayaa Akadeemiye-Goboleedka, ay ka mid yihiin maqaawiir aan jeclahay. Mahadnaq ka dib, waxaan rabaa in aan sheego bishaaro ah in af Soomaaligu nool yahay. Af Soomaaligu waa afka rasmiga ah ee waddanka. Luqadda caafimaadkeedu wuxuu ku xiran yahay caafimaadka bushadeeda.

Aad baan ugu farxay, markaan ogaaday inay AGA wakiillo ku leedahay meelo badan. Sida: Jabuuti, Jigjiga, Hargeysa iyo goboladoo dhan iyo dalka dibaddiisa. Arrintaas waa arrin yiddiilo leh, rajo fiicanna gelinaysa ummadda Soomaalliyeed. Adeegsigooda iyo ku dhaqankooda afka Soomaaliga iyo horumarintiisa. Waxaan bogaadinayaa Akadeemiyadan. Waxaana u sheegayaa in aan garab-taagannahay. Waxaan ku faanayaa, macallimiintayda rag iyo dumarba leh ee ka shaqaynaya una istaagay siday af Soomaaliga u toosin lahaayeen." ayuu yiri md Cawad.

Madasha AGA, waa madal loo abuuray, kana shaqaysa horumarinta afka hooyo iyo halabuurkiisa.

Wasiirka Dhaqanka iyo Dalxiiska DDS oo ka Hadlay Xaaladda Adeegsiga Af Soomaaliga ee DDS

Wasiirka Dhaqanka iyo Dalxiiska Mudane Ilyaas Abiib oo si uu toos u daah-furay Madashii AGA ee bisha Sebtembar ee 2020-ka ayaa sharraxaad ka bixiyay sida ay xukuumadda Dawlad Deegaanka Soomalida (DDS) uga go'an tahay horumarinta AfSoomaaliga.

Wasiirka ayaa iftiimiyay heerarka adeegsiga AfSoomaaliga ee DDS, goobaha waxbarashada, xafiisyada dowladda iyo sida uu afka Soomaaligu u yahay luuqadda koowaad ee dawlad deegaanka Soomaalida.

"Afka Soomaaligu waxa uu leeyahay taariikh aad u qotodheer, waxaana uu ka mid yahay afafka ugu muhiimsan Qaaradda Afrika, waxaana lagama maarmaan ah ummadda Soomaaliyeed in ay garato muhiimada uu leeyahay afkooda hooyo." ayuu yiri Wasiirka Dhaqanka iyo Dalxiiska Mudane Ilyaas Abiib.

Dawlad Deegaanka Soomaalida ayaa ka mid ah maamulada sida weyn xilka isaga saaray xoojinta adeegsiga af Soomaaliga ee dhinacyada maamulka & waxbarashada.

Wakiilka Akadeemiye-Goboleedka AGA ee Galmudug Abwaan Cali Deeq oo la Kulmay Maamulka Galmudug

Wakiilka Akadeemiye-Goboleedka Galmudug, Abwaan Calideeq Maxamed Xaashi ayaa 15/9/2020, Xarunta Galmudug ee Dhuusammarreeb waxa uu kula kulmay Wasiir-ku-xigeenka Waxbarashada, Hiddaha & Tacliinta Sare ee Dawlad-goboleedka Galmudug, Mudane Shariif Maxamed Khaliif. Wakiilka AGA ayaa wasiirka uga warbixiyay, dadaalka ay Akadeemiye-Goboleedku ugu jirto horumarinta afka hooyo iyo halabuurkiisa.

Wasiir ku-xigeenka ayaa uga mahadceliyay madaxda AGA, dadaallada hagar-la'aaneed ee dal iyo dibadba ugu horumarinayaan afka Soomaaliga. Wuxuuna u ballanqaaday Wakiilka AGA ee Galmudug inay garab buuxa ku siinayaan dhaqdhaqaaqa hiilka afka hooyo iyo halabuurkiisa.

Laantan Galmudug waxay ka mid tahay, laammaha Akadeemiye-Goboleedka leedahay dalka gudihiisa. Taas oo qayb ka ah, hiilka iyo horumarinta afkeenna hooyo.

Hadafkayagu waa u hiillinta afka hooyo.

Macallin Saciid : “AfSoomaaligu waa Afafka ugu Muhiimsan Afrika”

Macallin Siciid Saalax Axmed oo ah Wakiilka Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ee Woqooyiga Ameerika oo ka mid ahaa martidii madashii bishii 8aad ee cinwaankeedu ahaa: “Xaaladda Adeegsiga AfSoomaaliga ee Maamulka iyo Ganacsiga” ayaa si faahfaahsan uga sheekeeyey sooyaalkii dheeraa ee AfSoomaaliga, isaga oo xusay heerarkii ay soo martay qoraalka farta iyo fidinteedii.

“Afka Soomaaligu waxa uu safka hore kaga jiraa afafka ugu muhiimsan Qaaradda Afrika. Ummadda Soomaaliyeed waxaa looga baahan yahay inay afkooda siiyaan kaalinta uu ka mudan yahay, waxaana habboon inuu si weyn uga dhex muuqdo dhinacyada Maamulka, Waxbarashada iyo Ganacsiga.” ayuu yiri Macallin Saciid Saalax

Macallinku wuxuu si gaar ah uga hadlay burburkii waddanka iyo sida uu dhaawaca u soo gaaray qoraalkii farta Soomaaliga. Isaga oo dhinaca kale qiray in xilligaan uu afka Soomaaligu sameeyay kobac weyn, loona baahan yahay in la sii xoojjiyo.

Wuxuu soo qaatay Macallin Siciid, tusaalayaal u baahan in la af Soomaaliyeeyo. Sida: codsiyada shaqada, kaararka aqoonsiga iyo warqadaha bangiyada, oo dhammaatood la xiriira arrimo maamul.

AGA oo Buug ugu Deeqday Maktabadda Gaalkacyo

Wakiilka Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga ee Galmudug, Abwaan Cali-deeq Xaashi, ayaa guddoonsiiyay Maktabadda Gaalkacyo, buugaag ay Akadeemiye-Goboleedku ugu deeqday.

Madaxa maktabadda Gaalkacyo, Mudane Garaad Axmed Rooble, oo buugta guddoomay ayaa Akadeemiye-Goboleedka uga mahanaqay deeqdan buugta ah, isagoo sheegay inay maktabaddu u baahneed buugaagta la guddoonsiiyay.

Abwaan Cali-Deeq oo goobta ka hadlay ayaa sheegay in deeqdani ka mid tahay dadaallada ay Akadeemiye-Goboleedku kaga qaybqaadanayso sidii magaaalooyinka loogu baahin lahaa maktabado dadweynuhu ka faa`iidaystaan iyo sidii bulshada dhexdeeda loogu baahin lahaa dhaqanka akhris-qoraalka. “Hore ayay Akadeemiye-Goboleedku deeq buugaag ah u gaarsiisay maktabado dhow ah oo ku kala yaal magaalooyinka kala duwan” ayuu yiri Abwaan Cali-Deeq

Sidoo kale, abwaanku wuxuu bogaadiyay hawlaha ay hayso maktabadda Gaalkacyo.

Maktabadaha dadweynuhu waxay qayb libaax ka qaataan baahinta aqoonta guud ee dadweynaha iyo kobcinta dhaqanka suubban ee akhris-qoraalka oo lafdhabar u ah horumarka ummad kasta. Waxaa farxad ah inay soo kordhayaan maktabadaha laga furayo magaalooyinku. Badiba maktabadahan waxaa abaabula dhallinyaro is xilqaamay.

WARAR KALE OO XUSID MUDAN

Gorfaynta Buugga Godob iyo Gallad

Xarunta Dhaqanka iyo Suugaanta ee Shuuriye ayaa 29/8/2020, waxay qabatay dood-cilmiyeed lagu gorfeeyay buugga Godob iyo Gallad

Madashaas oo si qurux badan loo soo agaasimay ayaa waxaa lagu martiqaaday xeeldheerayaasha qoraalka iyo hal-abuurka ay ka ka mid ahaayeen: Dr Xuseen Maxamed Cabdulle (Xuseen Wadaad), qoraha buuggii la gorfaynayay, Dr Maxamed Daahir Afrax, Prof Cali Jimcaale Axmed & qoraa Marwo Raxmo Isaaq.

Ugu horreyn waxa buugga faaqiday qoraha, oo si kooban u iftiimiyay mucdiisa iyo xogta uu xambaarsan yahay.

Dr Maxamed D. Afrax ayaa isagana ka hadlay dhaqanka, afka, qoraalka iyo hal-abuurka. Wuxuuna ammaanay, madallada noocan oo kale ah.

Prof Cali Jimcaale Axmed ayaa dul-istaagay, in uu Godob iyo Gallad ka mid yahay buugaagta laga tixraaci karo Muqdishadii hore.

Raxmo isaaq oo horay u gorfaysay buuggan ayaa sheegtay in ay fiicaan lahayd in buugga akhriyaan saxafiyiinta, si ay uga bartaan nidaam ay marto caddaaladda Soomaaliyeed.

Xarunta Laashin oo u Dabbaaldegtay 6-sannoguuradeedii

Xarunta Laashin ayaa 1-2/9/2020 u dabbaaldegtay sannadguudeedii 6aad. Kulamadan oo lagu qabtay aaladda ZOOM-ka ayaa waxaa soo qabanqaabiyay bahda Lashin, waxaana horkacayay guddiga Laashin oo uu hoggaaminayo guddoomiye, Dr Xuseen Maxamed Cabdulle “Xuseen Wadaad”

Dabbaaldeggan oo socday laba maalmood ayaa maalintii koowaad waxaa marti ku ahaa Cabdiraxiin Hilowle Galayr oo ka mid ah asaasayaashii Laashin, Prof Cabdaalla Cumar Mansuur, Cabdiraxmaan Abtidoon iyo Fannaan Bashiir Cali Xuseen.

Aqoonyahannada ayaa meesha ka jeediyay muxaadarooin qiimo badan.

Kulankii labaad, dabbaaldeggii 6-sannoguurada Laashin ayaa waxaa marti ku ahaa xeeldheerayaasha kala ah: Prof Jimcaale Axmed, Dr Maxamed Daahir Afrax iyo Macallin Siciid Saalax Axmed.

Dhammaan martidii labada maalmood ayaa waxay halkaas ka jeediyeen muxaadarooyin wax-ku-ool ah. Duruus ku saabsan afka, dhaqanka, fanka iyo hal-abuurka Soomaaliyeed.

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga waxay hambalyo iyo bogaadin u diraysaa Bahda Laashin oo ka mid ah bahda hal-abuurka iyo qalinka. Sannado guul iyo horumar leh ayay u rajaynaysaa.

Buugaag Cusub oo Lagu Daahfuray Oslo, Muqdisho iyo Hargeysa

Oslo: buugga **5ta Tiir ee Guusha** ayaa 25/7/2020 lagu soo bandhigay magaalada Oslo. Buuggan waxaa qoray: Cabdi Jabbaar Sh Axmed.

Hargeysa: buugga **Cidi ma kuu sheegtay?:** Maansadii abwaannada Nuur-Xaashi iyo Ismaaciil Aflow ayaa 07/8/2020 lagu soo bandhigay magaalada Hargeysa. Waxaa ururiyay: Fu`aad Cabdirashiid (Booska)

Hargeysa: buugga **Hoombaro**: Diiwaanka Suugaanta Abwaan Axmed Colaad Digaale "Qorane" ayaa 07/8/2020 lagu daahfuray magaalada Hargeysa. Waxaa ururiyay: Maxamed Xirsi Guuleed "Cabdi-Bashiir"

Muqdisho: buugga **Hal'adayg** ayaa 8/8/2020 lagu soo bandhigay magaalada *Muqdisho:* Buuggan waxaa qortay: Qaali Muuse Nuunne.

Muqdisho: buugga **Jacaylka Dhabtaa Goormuu Dhashaa** ayaa 12/8/2020 lagu soo bandhigay magaalada Muqdisho. Buuggan waxaa qoray: Sh Maxamed Iddiris.

Muqdisho: buugga **Isdhexgalka Bulshada** ayaa 31/8/2020 lagu soo bandhigay magaalada Muqdisho**.** Buuggan waxaa qortay: Xamda Cabdullaahi Kaboole.

Muqadisho: buugga Ubaxii Waddanka ayaa 18/09/2020 lagu soo bandhigay magaalada Muqdisho. Buuggan waxaa qoray: C/llaahi Cali Xayle.

Daahfurka buugaagtu wuxuu ka mid yahay dadaalada aqooneed ee lagu kobciyo buug-faafinta, akhriska iyo aqoonta.

Xusuusta Suugaanta & Dawladnimada Soomaaliya 1960 – 1991

Hay`adda Bariga Afrika ee Cilmibaarista & Horumarinta Istanbul, ayaa 4/7/2020 ku qabatay aaladda ZOOM-ka Aqoonwadaag cinwaankiisu ahaa Xusuusta Suugaanta & Sooyaalka Dawladnimada Soomaaliya 1960 – 1991.

Aqoonwadaaggan ayaa waxaa marti ku ahaa Abwaan Axmed Aw Geeddi & Prof Mustafa Fayruus.

"Suugaantu waa muraayad iftiimiso nolosha iyo siyaasadda. Soddonkii sanno ee ugu horreeyay dawladnimada Soomaaliya, boqolkiiba saddex iyo siddeetan dadka Soomaaliyeed waxay ku noolaayeen miyiga, toddoba iyo toban kaliya ayaa magaalo ku nooleed. Sidaasdarteed, qiimo weyn ayay suugaantu ugu fadhisaa Soomaalida." ayuu yiri Pfof Fayruus.

"Suugaan badan baa laga abuuray habeenkii xornimada. Waxaa ugu caansanaa heestii Kulmiyaa la sudhee kadabaa dhaha uu leeyahay Abwaan Saxardiid Jibiye. Heesta Maandeeq ayaa la qaaday. Geeraarka caanka ah Kaana Siib, Kanna Saar ayaa ka mid ahaa wixii la tiriyey. Wax weyn ayaa laga filayay gobonnimada." ayuu yiri Abwaan Axmed Aw Geeddi.

Guddoomiyaha Hay`adda Bariga Afrika, Dr Cali Shiikh Axmed ayaa soo gabagabeeyay aqoonwadaagga.

Aqoonwadaagyada iyo dood-cilmiyeedyada aaladda ZOOM-ka lagu qabto, waxay aad u kordheen, xanuunka Karoonaha ka dib.

Falanqaynta Ololihii Akhris-qoraalka Soomaaliya 1974—1975

Maktabadda Baraarug ayaa 8/9/2020 qabatay muxaadaro cinwaankeedu ahaa Dib-U-Eegista Ololihii Akhris-qoraalka Soomaaliya 1974—1975.

Muxaadarada waxaa marti ku ahaa Cabdiraxmaan Maxamed Abtidoon iyo Fannaan Bashiir Cali Xuseen.

Mudane Abtidoon ayaa faahfaahiyay Ololihii Horumarinta Reer Miyiga. “Kun iyo toddobo boqol, iyo afartan arday ayaa ka dhaqaaqay 1da Luulyo ama Tiribuunka. Ololaha waxaa ka qayb qaatay labaatan kun oo qof. Ololuhu wuxuu ahaa mid aad u ballaaran. Waddama badan ayaa isku dayay ololahaas oo kale. Balse, ma gaarin meeshii ay Soomaaliya gaartay. Sababtoo ah, waddankoo dhan baa loo xiray ololaha.” ayuu yiri Abtidoon.

Barbaariye Bashiir ayaa isagana ka hadlay far barista qoraalka. “Intaan loo bixin ololaha gidaaradoo dhan waxaa lagu qoray Bar ama Baro. Ololaha waxaa horkacaysay wasaaradda waxbarashada iyo tacliinta. Muddo hal sanno ah ayuu socday ololuhu.” ayuu yiri Bashiir.

Muxaadaradan ayaa daaraneed xuska Maalinta Caalamiga Akhris-qoraalka. Cabdiraxmaan iyo Bashiir waxay ka mid ahaayeen, ardaydii ololaha ka qaybgalay.

Hambalyo! Maalinta Caalamiga ah ee Akhiris-Qoraalka

Akadeemiye-Goboleedka “AGA” oo xusto maalmaha afka iyo aqoonta ayaa 8/8/2020 hambalyo ku aaddan munaasabadda akhris-qoraalka u dirtay ummadda Soomaaliyeed.

Munaasabadda maalinta caalamiga ah ee akhriska-qoraalka ayay Hay’adda Waxbarashada Qarammada Midoobay u astaysay 8 Sebtember. Maalintan akhris-qoraalka ayaa looga dabbaaldegaa dunidoo dhan. Tan iyo sannaddii 1967. Ujeeddada loo asaasay maalintan ayaa ah in uu qofku beni-aadamka ah helo sharaf iyo karaamo. Taas uu ka helayo akhriska iyo qoraalka.

Soomaaliya waxay ku jirtaa waddamada la daalaadhacaya akhris-qoraalka. Taas oo hadda dib u hanaqaadayo burburkii ka dib.

Maalintan waxay ka mid tahay munaasabadaha sannadlaha ah ee ku saabsan afka, dhaqanka iyo guud ahaan aqoonta ee ay sida joogtada ah u weyneyso Akadeemiyadu, sida Maalinta Caalamiga ah ee Afka hooyo, Maalinta Buugga, Maalinta Macallinka iwm.

Akhriska iyo qoraalku, waxay udub-dhexaad u yihiin, kobaca horumarka aadanaha. Labaduba waxay ka qayb-qaataan, dheellitirka qofeed iyo waddaneedba.

KORORSO AQOONTAADA AFKA HOOYO

Eray-Abuurid

Eraygu waa nudda luuqad kasta. Wadajirka erayadu waxay sameeyaan qayb muhiim ah oo ka mid ah luuqadda, laguna magacaabo qaamuus. Waxa kale oo jira sharciyo habeeya isukeenidda erayada si ay u sameeyaan weero, waxana loo yaqaannaa weerayn.

Erayada ay luuqadi leedahay inta badan waa qani; erayo badan ayaa waxay ka farcami karaan erayo horay u jiray ama kuwo cusub ayaa waxay ka samaysmi karaan laba eray ama in ka badan oo laysu geeyay. Habab badan ayaana erayo lagu abuuri karaa.

Farac

wax kasta ama fikrad kasta waxaa loo allifay eray matalaya, maskadeenana midkaas ayeynu ku haynaa. Mabda' ahaan eray kasta waa in uu kaga duwanaadaa erayada kale, haba yaraatee qayb,si aan la isugu qaldin. Haddii erayga nal shay la iftiinsado oo la isla yaqaano uu yahay, isla eraygaas looma isticmaali karo shay kale, haddii kale waa lagu wareerayaa. Si aanu u dhicin wareerkaas waxaa loo baahan yahay in xarfaha uu ka kooban yahay erayga nal ugu yaraan mid ka mid ah isbaddelo:

1. Nal
2. Dal
3. Gal
4. Bal

Fiiri erayadan cusub ee kasoo farcamay erayo kale:

5. Fardoole oo kasoo farcamay fardo + le
6. Carruurnimo oo kasoo farcamay carruur + nimo
7. Geedinimo oo kasoo farcamay geesi + nimo
8. Bare oo asoo farcamay bar + e
9. Caddaan oo kasoo farcamay cad + aan

Sida ay tusaalooyinkani muujinayaan eray kasta waxa uu kasoo farcamay eray kale oo horay u jiray, kasoo lagu daray qayb kale oo layiraahdo dibkabe. Erayga cusubi waxa uu leeyahay micne ka duwan kii hore. Tusaale ahaan, erayga fardo waa noole xayawaanka ka mid ah, fardoole-se waa ninka iska le fardaha oo ah qof banii-aadan ah. Dibkabe yaashu waa qayb ka mid ah erayada qaarkood.

Dibkabaha –e, wuxuu la micno yahay "qof ama shay sameeya shaqo gaar ah", dibkabaha –le, wuxuu la micno yahay "qof ama shay leh wax", kuwaas oo shaqadoodu tahay in ay u badiyaan erayada luuqadda si fudud oo habaysan. Markaas hadlaha aad bay ugu fududuhay in uu barto dibkabe iyo erayada lagu nudaayo intuu adeegsan lahaa erayo cusub si uu u helo erayo leh macneyaal waxyar ka duwan.

Micno ballaarin: waa in erayga sidii asalkii lagu yaqiin kasokow uu yeeshay macne kii hore ka duwan.

Horray baynu u soo sheegnay in eray kastaa leeyahay micno u gooni ah hase yeeshee waxaan aragnaa erayo badan oo aan lahahayn hal micno oo kaliya sida:

Xagal

Xagal

Tusaale erayga xagal ee xarafka b, waa xagasha lugta. Halka erayga xagal ee xarafka t, uu yahay xagal ka mid ah afargees.

Haddaba eraygani waxa uu leeyahay laba macne oo kala duwan. Haddii si kale loo yiraahdana, waa laba shay oo wadaaga hal magac. Sidaas daraadeed waxa aynu oran karnaa macnihii ayaa ballaartay.

Erayada qaamuus ka waxaa lagu ballaarin karaa habka faraca iyo midka ballaarinta macnaha.

Qoraa Dayax Axmed Iley ayaa ka soo koobtay Barashada Naxwaha Af Soomaaliga, (1999, London)
Abdalla Omar Mansur & Annarita Puglielli, bb. 11-12



SUUGAANTA & HAL'ABUURKA

Gaashaanqaad Habaabay (*Sheeko Gaaban)*

Maradii uu ku duuduubnaa ayuu ka hurgufay. Wiilkii dhuubnaa ee marada ka soo dhex baxay ayaa dhawr jeer isku dayay in uu cagahiisa ku istaago wuuse kariwaayay. Tabardarri ayuu la dalanbaabbiyay. Sariirtan korkeeda ayuu ku lafalafoobay. Hilaadin iyo hawa adduun baa nuxurkii iyo nafaqadii ka nuugay. Intuu feenmay ayuu fartaas ka dhuubdhuubtay. Firfircoonidii uu waxbarashada ku idleeyay iyo siday uga shiiqday isuma dhigmaan. Han weyn iyo hididdiilo ayuu saddex sanno ka hor uga baxay jaamacadda. Inuu shaqo helo, hooyadiis nasato ayuu sii qorshaystay. Dadaal taagan iyo damiir joogta ah ayuu dharaar kasta ku aadi jiray jaamacadda.

Markuu jaamacadda ka baxo, in ay reerkiisu ka tallaabsan doonaan saboolnimo ayuu aaminsanaa. Inay hooyadiis dhigi doonto, baaldiga ay subax kasta la dheelmato, iyo inuu ka reebi doono qaylada dilootay ayuu ku tashaday. Hooyadiis waxay ku soo korisay isaga, walaalhiis iyo xataa aabbihiis, ganacsi jaadad badan. Siday u guursatayba waxay ku jirtay saalaxweetayntaas. Waxaa ugu dambeeya, baaldigaas ay ku soo wareejiso beerka iyo killida ariga. Aroor welibana la dhex qaaddo jidcaddayaasha xaafaddeeda ku xeeranoo dhan. Hadhowna soo noqoto iyadoo jidiinqalallan oo daallan. Quudkii reerkasa waddo.

Markuu qalinjebiyay ayuu isudiyaariyay inuu bilaabo shaqadii uu la sugayay shahaadada jaamacadda. Xirfaddii uu soo bartay ayuu la aaday ehelkeedii. Shirkad kastoo shaqo loogu sheegay ayuu albaabkeedii garaacay. Wuuse ku soo hungoobay.

Dawladdii ayuu ula noqday deyradii iyo daalkii uu la soo kulmay. Dawladda wuu isxijinayay. Inay dadkoo dhan u siman tahay ayuu uurka ku hayay. Wuxuu soo galay xafiiskii loogu sheegay inuu qaabbilsan yahay shaqaalaynta cusub.

Xafiisyadan uu damacsan yahay inuu ka shaqeeyo, waligiis ma soo dhexgalin inuu ag maro mooyee.

Laakiin, hungadii ayuu u raaciyay quus iyo qalbijab hor leh. Waxaa si cad loogu sheegay inuusan il saaraynin shaqo, isagoon la socon, ninka dawladda wakiilka uga ah. "Ninkastoo xil haya ima ma talo miyaa?" ayuu yiri, isagoo muraaradillaacsan. Ninkii hor fadhiyay ayuu yu'day. Isagoo u soo dhiibaya faylashiisii ayuu yiri: "Adeer, waan ku arkayaa inaad cunug yar tahay. Waanse kuu sheegayaa siday wax yihiin. Qof kastoo aad ku arkayso dawladda dhexdeeda, wuxuu matalaa reerkiisa. Kollay nin uun baa ku mataloo, reer la'aan ma tihid…" isagoo hadalkii u dhammaynin buu albaabkii fur-dug ka soo yiri. Caaddifad ciil ku milan baa ka oggolaan weyday inuu si wanaagsan u dhuuxo, hadalkiisii waanada iyo diidmada kawada tarjumaya.

Runtii qaraareed ayaa sii dubatay maalmihii ka dambeeyay maalintaas uu dadnimadiisa, dalkiisa iyo dadkiisaba isla-nacay. Qofkastoo uu naxariis iyo nugayl ku bidayay ayuu kula eertay dhibtii soo wajahday. Waxaa lala raadiyay ninkii xafiiskii dawladda looga soo tilmaamay ee kursigii reerkiisa ku fadhiyay. Markuu tagay gurigiisii, in uu la kulmo Yabaal ayuu ka dhaartay ninkii. Waaba isagoon matalin dadka danyarta ah. Inta hodanka ah ayuu hawlahooda fududeeyaa.

Isagoo dhab u aaminay maahmaahdii ahayd 'Nin geed u buuxo, ayay gari u go'daa' ayuu ka soo luuday daartii ninkii maqaarsaarka ku matalayay. Siduu maalintaas u seexday ayuu u jiifaa.

****

Isagoo kor u haya maradii uu ka xayuubiyay ayuu yiri: "Har iyo habeen sidaas ayaad u jiiftaa. Hurdo habar ma korisee, ka kac jiifka."

Hooyadiis oo soo galaysa ayaa la soo kulantay qayladii dhex maraysay Yabaal iyo aabbihiis. Iyadoon sifiican u soo galin ayay la soo tanaagootay.

(sii raac bogga 15aad)

“Habari cid ay koris uga baahan tahay ma jirtee, wiilka ii dhaaf.”

“Maxaad warka uga leexisaa majarihiisa! Wiilkan dheeggiisu dhulka caadaystay, waa in aan sidan u dhaanno.” ayuu kula jeestay islaantiisii soo noog-tay.

Yabaal iyo hooyadiis oo firkannaxsan ayaa wada eegay afkiisii.

“Waan diraynaa Yabaal.” ayuu cod buuxa ku yiri.

‘Allaylehe’ ayay indhahoodii argaggax-faraxsanaa ku yiraahdeen. Yabaalkii iltaalka darnaa baa qum-maati isu-taagay. Hooyadiis way qabtaa inuu baxo. Way doonaysaa, inuu isaga tago waddankan maankiisii curdanka ahaa gantoobay. Waxaana halhays u ahayd, dhimo ama dhoof. Laakiin, taasi waxay ka ahayd afgabaadsi ee waxay yiqiinsan tahay, inaysan haynin waxay ku dirto. Hadalkeed-aas guubaabada ah, wuxuu ku guntamay laabtii Yabaal. Wuxuuba isku qafilay inuusan shaqo iyo sharafba ka halaynin waddadkiisa. Wuxuu isu-qibleeyay bixitaan iyo dibad. Muxuuse ku baxaa, xaggeese ayuu adaa?

****

“Maxaad ku diraysaa?” ayay odaygii arrinta keenay weyddiisay.

Saddexdoodii ayaa salka saartay sariirtii Yabaal. Odaygii afkiisii baa la wada dhawray. Intuu codkiisii xabeebta ka saaray ayuu yiri: “Waan ogahay in aad isweyddiinaysaan, xagguu ka keenay hantida uu wiilka ku dhoofinayo…”

Indhihiii ayay ku tageen. Sidii inuu fikraddii ka noqday ayuu gadaal u dagay.

“Wad. Wad.” ayay ku dhiirrigelisay. Yabaalna afkii ayuu gacanta ku dhaabay. Sidii inuu ka baqayo, inuu eray soo dhaafo.

“Waxaan doonayaa in aan iibiyo gurigeenna…”

Yabaal baa istaagay. Hooyadiis baa ku xigsatay. Waxay ku noqotay naxdin holon ka kulul. Hooyadiis baase sifiican u gubatay. Iyadoo gadoodsan ayay tiri: “Ma cooshaddii aan ilmaha ku ilaashanay, ayay rajo kaa soo gashay!...”

“Adigoon seefta la boodin, aan miyir wax isufahamsiinno.” ayuu ku qaboojiyay.

Iyadoo warwareeganaysa ayay tiri: “Hadduu Ilaahay odayga reerka talaxumo bado, abaar ka xun ay reerkaas gali lahaayeen ma jirto.”

“Wax-mataranimadii, ma talaxumo ayaad iigu dartay!”

“Sideed garashadaada uga dhaadhicisay, inaad iibiso, hoygii aan adduun ka lahayn?”

“Hooyo…” Yabaal baa isku dayay inuu kala dhexgalo.

“Waan ogaa in aad xumaan maagan tahay, markaad neefneefsanaysay.”

“Hooyo…” intaanu dhamayn Yabaal ayay ka dhex gashay.

“Hooyo, hooyo ha ku wardinee, ma ku raacsan tahay aabbahaa, in laguu iibiyo gurigaas xunka ah?” Hoos buu madaxa u rog-tay. Mar labaad ayay qarracantay. Guriga, odayga, ilmaha iyo adduunkoo dhan Yabaal bay ka jeceshahay. Laba daran mid dooro ayaa ku legdantay uurkeedii.

****

Lacag aan u qalmin ayay gurigii ku rahmeen. Markii dambana waa lagala wareegay. Yabaal wuu baxay. Isagoon garanaynin meel uu ka bilaabo socodkiisa iyo yoolkiisa toonna ayuu waddankii ka tagay. Waddamadii geesta Afrika ayuu isu-dhaafay. Markii dambe, ayuu socod-kiisii af-yeeshay. Koofur Afrika inuu aado ayuu ku dhex go’aansaday waddankuu sii marayay. Reerkiisii ayuu u soo sheegay rabitaankiisa. Duco iyo nolol bay u rajeeyeen.

Intaas ka dib, buu hadalkiisii go’ay. Beryo iyo bilaba waa la baafiyay. Cid aan la weyddiinin iyo meel aan laga raadinin ma jirto. Baa-diggoob badan ay sameeyeen reerkiisii, wax-base kama soo naasacaddaan. Hammigii uu la dalaabay ayuu la maqan yahay. Aakhiradii la yaqaanay laguma hubo. Adduunkii la joogayna laguma oga.

W.Q

Saynab Xaaji Axmed “Ugbaad”

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaligu (AGA) waa xarun aqooneed loo abuuray daryeelka iyo horumarinta Af-Soomaaliga iyo hal-abuurkiisa suugaaneed. Waa madal ay ku bahoobeen dalalka Geeska Afrika ee Soomaalidu degto, AfSoomaaligana lagaga hadlo.

AGA waxaa lagu asaasay dalka Jabuuti bishii Juun 2013. Xarunteedu waa Magaalada Muqdisho, waxayna laamo ku leedahay Magaalooyinka waaweyn ee Geeska Afrika iyo da-lalka qurbaha ee ay aad u joogaan Soomaalidu.

Hawlgalka AGA (Mission)

Ilaalinta afka hooyo, iba-furka hal-abuurkiisa
iyo turxaan-bixinta adeegsigiisa, qoraal iyo qawlba;
iyo inuu Af-Soomaaligu noqdo afka rasmiga ah
ee maamulka iyo waxbarashada geyiga Soomaalida.

Akadeemiye-Goboleedka AfSoomaaliga
Intergovernmental Academy of Somali Language

HAMBALYO

XUSKA MAALINTA CAALAMIGA EE AKHRIS-QORAALKA ADDUUNKA

08/09/2020